Oregon Health Authority
QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Badanka la Iska Waydiiyo Hagida Dib u furida

Dukaamada tafaariikhda, Xarumaha Dukaameysiga iyo moolasha*(La cusbooneysiiyey 5-21-2020)*

Hoos waxaa ku yaal jawaabaha su'aalaha badanaa la isweydiiyo ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)waaxda hagida dukaamada tafaariikhda taasoo khuseysa gobolka oo dhan, laga billaabo 15ka Maajo. Xusuusnow in xarumaha dukaameysiga wax laga iibsado iyo suuqyada badanaa su’aalo la isweydiiyo ee hoos ku xusan waxay khuseeyaan oo keliya gobollada loo oggolaaday ee loogu talogalay Marxalada 1 Dib u furida.

Hawlgallada

S1: Dukaamada wejiga labaad ma laga yaabaa inay aqbalaan tabarucaadka Marxalada 1 ee dib-u-furista?

J1: Haa. Marka ay qaadayaan alaabada la soo celiyay, shaqaalaha waa inay gacmaha dhaqdaan ama isticmaalaan gacmo nadiifiye ka hor iyo kadib taabashada alaabada. Ganacsadaha dukaanka tafaariiqda wuxuu gooni u dhigi karaa alaabada hal maalin ama ka badan haddii uu ka welwelsan yahay halisyo u baylah noqosho.

S2: Xagee bay xafiisyada guryaha kireeya ku haboon yihiin?

J2: Xafiisyada Guryaha kireeya waa inay raacaanHagaha Shaqaaleysiiyayaasha Guud ee OHA. Xafiisyada guryaha kireeya waxay muraajaceyn karaan hagida tafaariikhda wixii talosoojeedin ah oo ay donayaan inay raacaan.

S3: Dukaan tafaariikhda ah, miyaan ku khasbay macaamiisha inay xirtaan maaskaro wajiga?

J3: Haa, laakiin dukaanka tafaariikhda waa inuu sameeyaa siyaasad oo dhajiyaa calaamado cad oo ku saabsan wixii shuruudahaas oo kale ah. Siyaasad uga baahan macaamiisha iyo booqdayaasha inay xirtaan daboolka wejiga waa inay:

- Siisaa ka reebitaan siyaasadda ah si loo qaabilo dadka qaba xaalado caafimaad oo gaar ah, ama carruurta ka yar laba sano jirka.
- Xisaabta ku darsataa in meelaha qaabilaadaha dadwaynaha ay tahay inay ku sameeyaan wax-ka-baddalo macquul ah siyaasadahooga si ay ugu saamaxaan dadka naafada ah inay galaagal u yeeshaan adeegyadooda.
- Xisaabta ku darsataa in farista dadka inay xirtaan daboolka wejigu ay dadka si kala duwan u saamayso oo ay kujiraan dadka aan caddaanka ahayn kuwaasi

oo ka qabi kara tabasho sarraysa midabtakoor iyo dhibaatayn loo gaysto oo sababtuna tahay inay daboolka wejiga ku xirtaan dadwaynaha dhexdooda.

- Isku daydaa in la siiyo daboolka wejiga macaamiisha ama booqdayaasha aan iyagu haysan. Haddii dukaanku dejiyo siyaasad ah in dhammaan macaamiisha looga baahan yahay inay xirtaan maro, xaashi ama dabool fur-oo-tuur ah oo wajiga lagu daboolo, maamulka dukaanka waa inay la tashadaan la-taliyahooda sharciyeed si loo go'aamiyo in shuruuddaha noocani ah la fulin karo iyo in kale.

S4: Sideen u go'aamiyaa tirada macaamiisha u oggolaanaya bakhaarka?

J4: Maamulka dukaanka waa inay go'aamiyaan dadka ugu badan ee ku jiri kara dukaanka si loo joogteeyo kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) dhudhun, iyadoo la tixgelinayo aagagga dukaanka ee dadku ku badan yihiin (sida dariiqyada gudaha dukaanka ah) ayna si habboon u xaddidaan soo galida dukaanka.

S5: Suuqyada beeraleyda ama suuqyada kale ma yihiin suuqyo Marxalada 1 loo furi karo?

J5: Suuqyada beeralleyda ama suuqyada furan marna loogama baahna inay xidhaan Amarka Fulinta ee Maamulka. Iyadoo la raacayo Hagida OHA , suuqyada beeralayda iyo suuqyada kale ee furan waa inay hubiyaan in macaamiisha, shaqaalaha / iibiyayaasha, inay adkeystaan ugu yaraan lix (6) dhudhun oo masaafad ah.

S6: Dukaammada tafaariiqda ah miyey heli doonaan tijaabooyin iyo raad raac?

J6: Raadinta xiriirku waa qeyb caadi ah oo ka tirsan shaqada waaxaha caafimaadka dadweynaha waana in degmadu ay diyaar u ahaato oo ay awood u la yeelan kartaa raadinta si ay ugu gudubto Maraxlada 1. Awoodda baarista ayaa si dhakhso leh u kordheysa. Haddii aad shaqaalaha u raadineyso baaris caafimaad, la xiriir qeybta waaxda caafimaadka ee degmada .. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan baaris caafimaad iyo raadinta xiriir fadlan Ugudbi Oregon COVID-19 Baaris caafimaad iyo Istaraatiijiyad Raadinta .

S7: Haddii macaamilka joogay dukaankeyga ku dhoco COVID-19, miyaan mas'uul ka ahay?

J7: Haddii aad qabtid arrimo la xiriira mas'uuliyadda waxaad la xiriiri kartaa qareenkaaga sharciga.

S8: Waxaan ogaaday in meherado badan ay leeyihiin saacado gaaban. Ma jiraan wax shuruud ah oo ah in tafaariiqlayaasha la xidhayo wakhti cayiman?

J8: Ma jiro wax shuruud ah in tafaariiqlayaasha ay xiraan waqti cayiman ama ay beddelaan saacadahooda ay shaqeeyaan.

S9: Madxafyada miyaa looga baahan yahay inay raacaan hagidda dib-u-furitaanka ee dukaamada tafaariiqda? Waa maxay hagida matxafyada?

J9: Madxafyada hadda waxay ku xiran yihiin Amarka Fulinta hoos imanayo 20-25 waxaana laga yaabaa inay dib u furtaan ama ballaariyaan howlihii mar lagu caddeeyay hagida OHA oo uu oggolaaday Guddoomiyaha Gobolka.

S10: Sidee buu dukaanka tafaariiqda u hubin karaa u hoggaansanaanta, ugana hor-tagi karaa isu imaanshaha, oo uu u hoggaansami karaa hagida OHA ee dukaamada tafaariiqda?

J10: Waxaa si weyn loogu talinayaa in dukaamada tafaariiqda ay u xilsaartaan qof shaqaale ah kormeere si loo hubiyo uhagidahagida OHA ee dukaamada tafaariiqda lagana hortago isu imaatinka. Kormeeraha ayaa waliba samayn kara waajibaadka kale ee dukaanka tafaariiqda.

Shaqaalaha

S1: Waa maxay talo soo jeedinta shaqaalaha lagu karantiilayo haddii shaqaaluhu uu la kulmayqof qaba fayraska?

J1: Waxaa lagu talinayaa in shaqaalaha la karantiilo afar iyo toban (14) maalmood laga soo bilaabo markii ugu dambeysay ee shaqaaluhu uu xiriir la yeeshay qofka qaba fayraska. Caafimaadka guud ee degmadu waxay u badan tahay inay kula soo xiriiraan si ay kaaga caawiyaan xaaladdan iyada oo loo marayo nidaamka raadinta xiriirkooda.

S2: Meheradlaha tafaariiqda miyaa looga baahan yahay ama waxaa lagula taliyaa in ay shaqaalaha ku sameeyaan baaritaan caafimaad Ka waran bedelkii is-kormeerid caafimaad lagu sameeyo shaqaalaha?

J2: Waxaa lagula talinayaa in meheradlaha tafaariiqda tixgeliyaan baaritaano caafimaad oo joogto ah (tusaale ahaan, baaritaanka heerkulka iyo astaamaha neefsashada) ama qaabka ay shaqaaluhu iskood uga soo warbixiyaan astaamaha, haddii ay la xiriirto shaqada ayna waafaqsan yihiin shuruudaha meherada iyada oo la raacayo nidaamka kheyraadka aadanaha.

S3: Miyaan ka qaadi karaa heerkulka shaqaalahayga?

J3: Iyadoo la raacayo hagida OHA,meheradlaha tafaariiqda waxay tixgelin kartaa baaritaano caafimaad oo joogto ah (tusaale ahaan, baaritaanka heerkulka iyo astaamaha neefsashada) ama qaabka ay shaqaaluhu iskood uga soo warbixiyaan astaamaha, haddii ay la xiriirto shaqada ayna waafaqsan yihiin shuruudaha meherada iyada oo la raacayo nidaamka kheyradka aadanaha.

S4: Haddii meheradlaheena tafaariiqda go'aansado inuu shaqaalaheena heerkulka ka baaro, ma jiraa heerkulbeeg gaar ah oo la adeegsado kaas oo aan xad dhaaf aheyn?

J4: Haa, waxaa lagu talinayaa inaad isticmaasho heer-kulbeeg aan-taabasho lahayn.

S5: Haddii xarunta tafaariiqda ay leedahay shaqaale ilaalin kara kala-fogayn jireed, miyaan wali u baahan nahay inay xidhaan maaskaro?

J5: Xarunta tafaariiqda waa inay faraan shaqaalaha, qandaraaslayaasha iyo tabarucayaasha inay xirtaan maaskaro, weji difaace, ama weji dabool, ilaa ay jirto qaabilaad loo samaynayo dadka naafada ah ama si kale loo dhaafayo oo ku taxaluqa Hagida Maaskaraha iyo Weji Daboolka loogu talogalay Ganacsiga, Dalmarka iyo Bulshada. Shaqaaluhu waa inay sidoo kale ku xajistaan ugu yaraan kala fogaan jireed oo lix (6) dhudhun ah.

S6: Miyaa weji daboolka looga baahan yahay shaqaalaha macaamiisha qaabilaya kaliya ama sidoo kale shaqaalaha aan la macaamilin macaamiisha (tusaale ahaan, shaqaalaha bakhaarka)?

J6: Hagida Maaskaraha iyo Weji Daboolka loogu talogalay Ganacsiga, Dalmarka iyo Bulshada waa inay faraan shaqaalaha, qandaraaslayaasha iyo tabarucayaasha inay xirtaan maaskaro, weji difaace, ama weji dabool, ilaa ay jirto qaabilaad loo samaynayo dadka naafada ah ama si kale loo dhaafayo oo ku taxaluqa. Tani waxay qusaysaa dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya agagaarka macaamiisha iyo / ama shaqaalaha kale. Shaqaalaha ka shaqeeya bakhaarka halka ay dadka kale Meesha ka shaqeeya ama gala waxay ku qasban yihiin maaskaro iyo hagitaanka weji daboolka.

S7: Dukaammada tafaariiqda ah ee aan la xirin oo ku jiray in la xiro sidii looga baahnaa Amarkii Guddoomiyaha Gobolka ee 20-25, shaqaalahasi ma looga baahan yahay weji daboolka?

J7: Haa. Dhammaan tafaariiqleyda, oo ay ku jiraan bagaashka iyo dukaamada farmashiyaha, waa inay u hoggaansamaan Hagida loogu talagalay Dukaamada Tafaariiqda iyo Maaskarada iyo Weji Daboolka Hagida Meherada, Dalmarka, iyo Bulshada .

Xarumaha Dukaamaysiga iyo suuqyada

Hoos waxaa ku yaal jawaabaha su'aalaha had iyo jeer la isweydiiyo ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) Marxalada Koowaad Hagida Dib u Furida: Hagitaan gaar ah oo loogu talagalay xarumaha dukaamaysiga iyo suuqyada:. Xarumaha dukaameysiga iyo hagida suuqyada iyo Su'aalaha inta badan la isweydiiyo waxay khuseeyaan oo keliya xarumaha dukaameysiga iyo suuqyada oo ka howlgalaan degmo taas oo loo oggolaaday Marxalada 1 ee Dib-u-furista.

S1: Fadlan caddee goorta ay suuqyada iyo xarumaha dukaameysiga dib u furmi karaan. Miyay degmo kaliya u tahay haddii loo oggolaaday dib u furitaanka Marxalada 1?

J1: Haa. Xarumaha dukaameysiga iyo suuqyadu waa inay ahaadaan kuwo xirnaanaya illaa degmadooda ama gobolkooda loo oggolaado inay galaan marxalada 1 waana inay u hoggaansamaan Hagida OHA ee xarumaha dukaameysiga iyo suuqyada iyo hagida kale ee khuseysa OHA. Amarka Fulinta kasta ee 20-25, xarumaha dukaameysiga iyo suuqyada ayaan laga mamnuucayn inay ku shaqeeyaan si ay u bixiyaan cuntada, bagaashka, daryeelka caafimaadka, caafimaadka, farmasiiga, ama adeegyada dukaannada xayawaannada.

S2: Dadka tafaariiqleyda ah miyey ku ku xidhmi karaan suuqyada la furayo laga bilaabo 15-ka Maajo?

J2: Dadka tafaariiqleyda ku xiran suuqyada waxay furi karaan kaliya haddii: 1) ay furaan albaabadooda dibedda oo keliya; 2) aan xigin meelaha dadku ku kulmaan; iyo 3) waxay u oggolaan kartaa qulqulka dukaameymiga isu ka socdo gaariga illaa iyo dukaanka, oo la mid ah suuqyada jidmarka ah.

S3: Haddii dukaanka raashinka uu ku yaalo gudaha xarunta dukaamaysiga isla markaana uu yahay dukaanka kaliya ee furan, meherada kale ee tafaariiqda ah ee ku yaala xarunta dukaamadu ma furmi karaan maaddaama dukaanka raashinka uu furan yahay?

J3: Maya. Dukaanka tafaariiqda ah oo ku sugan xaaladdan ayaa furi kara oo keliya haddii xarunta dukaameysiga uu ku yaallo degmo loo oggolaaday inay gasho marxalada 1 ee dib u furida oo uu suuq u hoggaansan yahay Hagida OHA ee xarumaha dukaameysiga iyo suuqyada.

S4: Haddii makhaayad ay ku taallo gudaha suuqa, ma ku bixin karaa kaabiga, adeegga qaadashada cuntada diyaarsan?

J4: Haa. Makhaayadahani waxay bixin karaan cunto ama sharaab guryaha lagu isticmaalayo (tusaale, qaadasho cunto diyaarsan) ama in qofka loogu geeyo meeshiisa iyadoo la raacayo Amarka Fulinta 20-25. Makhaayadaha cuntada waa inay sidoo kale raacaan Hagida OHA ee makhaayadaha iyo baararka.

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku siin kartaa dukumiintiyo qaabab kale ah sida luqadaha kale, daabacaad ballaadhan, farta indhoolayaasha ama qaab aad adigu doorbidayso. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.